# Lacag celintaada iyo in aad ahaatid qof u qalma caawimaada Caafimaadka iyo Shaabadooyinka Cuntada kadib marka aad heshid

U akhri si taxadar leh guud ahaan Qoraalkan. Haka boodin qaybna.

❖ **Maxay Waaxda Adeegaha Bulshada iyo Caafimaadka iigu soo direysaa jeeg lacag celin?** Waxaa dhici karta in aad u qalantid lacag celin ah lacagta aad kubixisey adeegahaaga daryeelka aad kuqaadatid guriga ama xarunta. Waxaan ku magacoownaa waxa aad kubixisid daryeelkaaga "kaqayb gal".

Waxaan muraajaco kusamaynay dacwadaada. Waxay u muuqataa in aadan ahayn in aad bixisid kaqayb galka. (Haddii aad kunooshahay xarun, waxaa khasab kugu ah in aad weli bixisid lacagta "qolka iyo guddiga", laakiin ma ahan kaqayb gal).

Ma ahayn in aad bixisid kaqayb galka qaanuun darteeda. Qaanuunkan waxaa lagu magacaabaa Haggaajinta Qajaarka. Qaanuunkan waxaa lagu dabakhayaa dadka qaar kuwaas oo hore u haystay SSI, laakiin hadda qaata oo keliya dheefaha Dammaanada Bulshada. SSI waxaa laga soo gaabiyay Dakhliga Dammaanada Dheeraadka ah. Waan ognahay in aadan hadda kujirin nidaamka Dakhliga Dammaanada Dheeraadka ah. Laakiin, aad hore u qaadatay Dakhliga Dammaanada Dheeraadka ah. Maadaama aad hore u qaadatay Dakhliga Dammaanada Dheeraadka ah, laakiin aadan hadda qaadan, ma ahayn in aad bixisid kaqayb galka. Waan saxnay khaladkeena. Ma ahan in aad hadda bixisid kaqayb galka.

❖ **Miyaan u baahanahay in aan wax sameeyo si aan u helo lacag celinta?**

Haa. Fiiri dukumeentiga lagu soo lifaaqay Oggaysiiskan. Wuxuu kuu sheegayaa waxa aynu u malayno in aad kubixisey kaqayb galka. Middaan waa tirada lacagta aadan ahayn in aad bixisid. Fiiri si aad u aragtid in ay tiradu saxtahay iyo inkale. Haddii ay saxtahay, sixiix dukumeentiga. Kasameyso nuqul aad kudartid diiwaanadaada. Dib ugu soo dir ama ugu soo celi dukumeentiga bakhshada lagu siiyey. Haddii aan sax ahayn, nagala soo xiriir halkan:

❖ **Kadibna maxaa dhacaaya?**

Waxaa khasab kugu ah in aad kuheshid jeegaaga lacag celinta gudaha 90 maalmood.

❖ **Ma ahaan doontaa lacag celintaan mid dhib u gaysata dheefahayga?**

Waa laga yaabaa. Waa in aad kataxadirtid waxa aad kusamaysid lacagta inta lagu guda jiro **sagaalka bilood** kadib marka aad heshid.

Waxaa jira seddex arimood oo aad muhiim u ah kuwaas oo aad u baahantahay in aad samaysid.

- Kuma qaadan kartid wax kabaddan $2,000 gudaha illooyinka aan laga reebin. Inta ugu baddan illooyinka aan laga reebin waa lacag jeeg ah ama koonto xisaabeed keydad ah.
- **<u>Laakiin,</u>** lacag celintaada **<u>looma xisaabi doono</u>** kasoo horjeedka xadka isha aan kareebka ahayn ee loogu talogalay **<u>sagaalka bilood</u>** ee ugu horeeya kadib marka aad heshid. Waxaad heli doontaa **<u>sagaal bilood</u>** oo joojin ah oo lagu sameeyo xadka isha aan kareebka ahayn. Tusaale ahaan: Haddii aad heshid lacag celintaada gudaha

Janaayo, joojintu waxay noqonaysaa illaa dhammaadka Sibtembar. Kadib marka ay sagaalka bilood dhammaadaan, illooyinkaaga aan kareebka ahayn, ay kujirto lacag celinta, waxaa khasab ah in ay ahaato **<u>hoosta</u>** xadka $2000. Si aad ugu jirtid caawimaad Caafimaadka, waxaad u baahnaan doontaa in aad tustid shaqaalahaaga maaliyadeed illooyinkaaga ay wax kaa soo galaan maalinta koowaad ee bisha tobnaad kadib marka aad heshid lacag celinta. Haddii ay lacag celintaada timaado gudaha Janaayo, waxaa khasab kugu ah in aad tustid shaqaalahaaga maaliyadeed waxa ay yihiin illooyinkaaga ay wax kaasoo galaan marka ay tahay Oktoobar 1. Haddii illooyinkaaga kareebida ahi ay yihiin kuwo kabaddan $2000 maalinta koowaad ee bisha tobnaad, **<u>waxaad weyn doontaa caawimaada Caafimaadkaaga iyo adeegaha daryeelka muddada dheer</u>**. Waxaad ahaan doontaa mid u qalma illaa bisha **<u>kadib</u>** marka illooyinkaaga kareebida ay kahoos maraan $2,000.

- Haddii aad qabtid **<u>wax</u>** su'aalooyin ah oo kusaabsan lacag celintaada, wac shaqaalahaaga maaliyadeed. Ahoow mid caqli baddan. Ka oggoow marka hore shaqaalahaaga maaliyadeed.

❖ **Waxaan qaataa Shabadooyin Cunto (Cunto Aasaasi ah). Lacag celintu macnaheedu ma wuxuu noqonayaa in aan qaadanayo Shabadooyin Cunto yar?**

Maya. Lacag celinta ma ahaan doonto mid saameysa Shaabadaha Cuntada. Uma baahnid in aad u sheegtid qayb kamid ah Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada in aad heshay lacag celinta.

❖ **Maxaan kusameeyaa lacagta la iisoo celiyay?**

- Waxaad kubixin kartaa lacagta wax kasta oo aad u baahantahay. Waxaa jira waxyaabo laga soo reebo. Waxaan kuugu sheegi doonaa hoos. Haddii aad qabtid su'aalooyin, wac marka hore shaqaalahaaga maaliyadeed.
- Hayso diiwaanada ama qoraalada iyo rasiidyada kusaabsan sida aad u isticmaalayso lacagtaada lasoo celiyay. Waxaan kuweydiisan karnaa in aad na tustid sida aad u bixisey.
- Waxaad sameyn kartaa:
  - In aad kubixisid biilalkaaga.
  - Kubixisid lacagta dheeriga ah adiga nafsadaada. Waxaad kusoo iibsan kartaa alaab guriga ah iyo dhar. Alaabta guriga waxaa kamid ah alaabta guriga ladhigo, qalabka wax lagu karsado, iyo Teleefiishino.
  - In aad ku haggaajisid gurigaaga ama gaarigaaga.
  - In aad qof wax ka siisid ama gebi ahaanba siisid. Keliya waxaad bixin kartaa lacagta oo dhan **inta lagu guda jiro sagaalka bilood ee ugu horeeya kadib marka aad heshid.**
  - Waxaad weyn kartaa u qalmida caawimaada Caafimaadka haddii aad bixisid wax kamid ah lacagtan kadib 9-ka bilood. Ha bixinin wax lacag ah kadib marka ay <u>sagaalka bilood</u> dhammaadaan aan ka ahayn haddii aad u tagtid marka hore qareen.
  - Haddii aadan sameynin isku habbeyno duugis/gubis iyo janaazad ah, waxaad u isticmaali kartaa lacagta in aad ayaga horumarin ugu bixisid. U sheeg gurig duugista in aad doonaysid kalsooni **<u>u qalmid-caawimaad Caafimaad</u>** aan kasoo noqod lahayn ama qorshe duugis ama janaazad hore-loo bixiyo. Middaan macnaheedu

waxay tahay in marka aad bixisid lacagta guriga duugista, aadan dib u qaadanaynin lacagta aad bixisey. Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada sidoo kale waxay kuu oggolaanaysaa in aad kuhaysatid kudhowaadkii $1500 koonto xisaab bangi gooni ah. Koontadaan xisaabta waa in si gaar ahi dhinaca la isaga dhigo si loogu bixiyo janaazadaada iyo duugista ama gubista. Lacagtaan looma xisaabo dhinaca xadka isha $2000 ee adiga laguu oggolyahay.

- Haddii aad guursatay, waxaad siin kartaa lacagta xaaskaaga/ninkaaga. **DIGNIIN:** Mayahay ninkaaga/xaaskaaga mid kujirta caawimaada Caafimaadka? Haddii ay haa tahay, asaga ama ayada waxay haystaan isla xadka $2,000 aad adigu haysatid. Waxaad kadhigi kartaa xaaskaaga/ninkaaga mid u qalma caawimaada Caafimaadka haddii aad sisiid lacagtaada celinta ah. Ahoow mid caqli baddan. Wac marka hore shaqaalahaaga maaliyadeed haddii aad qabtid su'aalooyin.
- **DIGNIIN:** Waxyaabaha qaarkooda oo aad soo iibsatid waxaa dhici karta in ay mushkilad kuu keento. Tusaale ahaan, waxaad haysan kartaa hal baabuur. Haddii aad iibsatid mid kale ama RV, qiimaha gaariga labbaad waxaa loo xisaabayaa kasoo horjeedka xadka isha. Waxaad kubedelan kartaa baabuurkaaga hadda ah lacag celintaada. Ahoow mid caqli baddan. Wac marka hore shaqaalahaaga maaliyadeed haddii aad qabtid su'aalooyin.

### ❖ Ma gelin karaa lacagtayda ammaanad?

Xeerarka ammaanada waa kuwo adag. Marka koowaad, haddii aad tahay qof kaweyn 65 sanno jir, waxkasta oo lacag ah oo aad gelisid ammaanad waxaa loo xisaabaa caawimaada Caafimaadka. Waxaa lagaa saari karaa caawimaada Caafimaadka haddii aad gelisid lacagta laguu soo celiyay ammaanad.

Haddii aad tahay qof kayar 65 sanno jir, waxaa dhici karta in aad awoodid in aad sameysatid ammaanad halka lacagaha kujira ammaanada aan loo xisaabin caawimaada Caafimaadka. Qiimaha sameysashada iyo kusii jirida ammaanad gooni ah waxay noqon kartaa mid sareysa. Dadka kayar 65 sanno jir waxay dhigi karaan lacagtooda lasoo celiyay gudaha ammaanada “kulman” ee uu qabto urur aan faa'iido raadis ahayn. Waxaa khasab kugu ah in aad tallo ka heshid qareen khibrad u leh mowduucyada u qalmida caawimaada Caafimaadka si uu kuugu caawiyo su'aalaha ammaanad dhigashada kusaabsan.

### ❖ Halkeen ka raadiyaa macluumaad dheeri ah?

Haddii aad u baahantahay tallo sharci ah waxaad ka wici kartaa khadka marwalba shaqeeya ee CLEAR lambarkan: 1-888-201-1014 ama tooska internet-ka halkan: [http://nwjustice.org/get-legal-help](http://nwjustice.org/get-legal-help).

Wixii kusaabsan welwelo dhiig miirasho ah, fadlan kala xiriir Adeegaha Ilaalinta Dadka waaweyn lambarkan 1-866-ENDHARM (1-866-363-4276).

Sidoo kale waxaad laxiriiri kartaa shaqaalahaaga maaliyadeed ee Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada haddii aad su'aalo qabtid.